

Macluumaad

Waqtiga xaadirka ah, barta internetka ee **bpas** waxaa lagu helaa oo keliya afka Ingiriisiga. Haddii aad rabto in aad imminka qof la hadasho waxaad naga soo wici kartaa **03457 30 40 30**. Haddii aad ka soo wacayso Ingiriiska dibaddiisa fadlan soo garaac **+44 1789 508 211**.

Wax ku saabsan **bpas**

bpas waa hay'ad samafal ah oo aanan macaash ku shaqaynin, taasoo la diiwaan geliyey 1968kii si ay u bixiso adeeg si nabdoon oo sharci ah ilmaha uurka looga soo ridayo.

Waqtigaan la joogo **bpas** waxay ilmo ka soo ridid sanad kasta u sameysaa in ka badan 65,000 oo haween ah - qiyaas ahaan 4,000 oo ka mid ah ay dibadaha ka yimaadaan.

Waan fahamsannahay in uu waqtigaasi dhib kugu noqon karo oo aad ka walwal qabi karto in aad dal kale u safarto, laakiin fadlan ogsoonow in **bpas** ay kuu xaqiijinayso in ay sameyn doonto wax kasta oo ay awooddo si ay hawsha kaaga dhigto mid sida ugu suuragalsan kuugu fududaata.

Way fududdahay in ballanta **bpas** dibedda laga soo dhigto si buuxda ayeyna qarsoodi u yihiin

Sida aad annaga noola soo xiriirayso

Haddii aad rabto in aad la hadasho qof aad ka waraysato fursadaha lagu kala dooranayo joojinta uurka waxaannu kugula hadli karnaa luqaddaada adigoo taas kharash dheeraad ah kala kulmin.

Si aad adeeggaas u isticmaasho fadlan **bpas** ka soo wac **03457 30 40 30**. Haddii aad ka soo wacayso Ingiriiska dibaddiisa fadlan soo garaac **+44 1789 508 211**.

Haddii uusan Ingiriisigu ahayn luqaddaada hooyo oo aad u malaynayso in aad caawino u baahan doonto marka aad ballaantaada u timaaddo, fadlan hubi in aad taas u sheegto hawladeenka **bpas** ee telefoonka kaa qabta. Tani waxay xaqiijin doontaa in aan qaadno tallaabooyin ku habboon in aan turjumaan kuugu diyaarinno.

Samaysashada ballanta lala dhiganayo **bpas**

Haddii aad ka soo wacayso Ingiriiska dibaddiisa, fadlan **bpas** ka soo wac lambarka:

+44 1789 508 211

Khadadka telefoonku waxay furan yihiin laga billaabo (saacadaha Ingiriiska):

8da subaxnimo ilaa 9ka habeenimo Isniinta - Jimcaha

8.30 subaxnimo ilaa 6da fiidnimo maalinta Sabtida

9.30 subaxnimo ilaa 2.30 duhurnimo maalinta Axadda

Haddii kale waxaad email noogu soo diri kartaa halkan info@bpas.org.

Waxaa faah faahinta ballanta laguugu soo xaqiijin karaa qoraal haddii aad rabto (iyo haddii uu jiro waqti ku filan si ay warqaddu kuu soo gaarto). Fadlan ogsoonow in **bpas** ay waraaqaha ku soo dirto baqshado aan la calaamadayn

Hawladeenka telefoonka kaa qabta ayaa kuu xaqiijin doona goorta iyo goobta aad rabto in aad baaristaada iyo daawayntaada ugu timaaddo. Ma jiraan taxaneyaalka sugid, isla markaana waxaad meelo badan, ka samaysan kartaa ballan ku beegan goorta hore subaxnimada, fiidnimada habeenka ama maalmaha dhammaadka toddobaadka.

bpas waxay xarumo ku leedahay Ingland iyo Wales waxaadna go'aan ka gaari kartaa halka aad rabto in aad tagto. Si aad goobaha u fiiriso, halkan riix.

bpas waxay sidoo kale ku siineysaa macluumaad la taaban karo oo ku saabsan u safridda rugaha caafimaadka a iyo halka aad joogi karto. **bpas** waxay leedahay dabacsanaan si ay u xaqiijiso in ay ballamuhu munaasab ku yihiin nolol-maalmeedkaaga.

bpas – waa mid wax daryeesha, asturnaan leh, si nabdoon hawsha u qabata, oo xirfad leh